

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 23^{AAD}

CADADKA 8^{AAD}

TAARIKH: 15/08/23

Lam. 05

FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

SHARCIGA IIBKA DHULKA DEGMADA GAROOWE

TUSMADA

Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Sharciga libka Dhulka Degmada Garoowe</i>
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 05 ee 15-ka Agoosto 2023, kuna saabsan Sharciga libka Dhulka Degmada Garoowe.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/54/2023, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2023.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga libka Dhulka Degmada Garoowe.

Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland


Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/54/2023 Garoowe, Khamiis, **Taariikh:- 10/08/2023**

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland

Garoowe

Ujeedo:-Ansixinta Iibka Dhulka Degmada Garoowe

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:

MARKUU ARKAY: -

Dastuurka DPL Qodobada 64-aad iyo 52-aad.

MARKUU ARKAY: -

Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada DPL Qodobkiisa 3-aad.

MARKUU ARKAY: -

Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/130/2023 ee July 17, 2023 kuna saabsan ansixin iibka Dhulka Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe.

MARKUU TIX-GELIYEEY: -

Baahida loo qabo in Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe yeelato dhisme cusub oo ay ku shaqayso.

MARKUU ARKAY: -

Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad, fadhigiisa 19-aad ee 10/08/2023 ku ansixiyey Iibka Dhulka Degmada Garoowe. Guntanka fadhiga oo ahaa (35) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol Iibka dhulka Degmada Garoowe (27) Mudane, Diidmo (6) Mudane, halka ay ka aamuseen (2) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Iibka Dhulka Degmada Garoowe.

Wada Shaqayn Wacan

Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

